

**Minnesota Storytime
Reading Guide**

Cinwaanka: *Wiil Waal*

Qoraaga: Kathleen Moriarty

Farshaxanka: Amin Amir
Tarjumaan: Jamal Adam

**Daabacaadda iyo
Taariikhda Xaqa
Daabacaadda:** Minnesota Humanities Center, 2007

Xiriirka Minnesota: Qorayaal reer Minnesota ah, daabace reer Minnesota ah

Hordhac: Sheekadani waa sheeko xariiro Soomaaliyeed oo dib loo soo tebiyey. Suldaan baa halxidhaale waydiiyey raggii uu xukumey. Gabar uu dhalay nin caydh ah baa talo aabaheed siisay, dadkiina ka yaabisay. Sheekadan waa mid ka mid ah afar sheeko xariirooyin Soomaaliyeed oo labo luqadood ku qoran, sawiranna, uuna daabacay Barnaamijka Buugaagta ku Qoran Laba Luqadood ee Hay'adda Minnesota Humanities Center. Hadii aad doonaysid akhbaar dheeraad ah, booqo websaydka: www.minnesotahumanities.org.

Da'da loogu talagalay: 4-6, 7-10

**Habka loo akhrinayo
sheekada:**


- Sheekada oo dhan hal luqad ku akhri si fahmideedu u sahlanaado.
- Hadii qofka akhrinaya uusan ku hadlin labo luqadood, isticmaal cajaladda "CD" ay ku duuban yihiin sheekada oo labada luqadoodba ah ee ay soo saartay Hay'adda Minnesota Humanities Commission.
- Daar muusik Soomali ah inta aadan bilaabin akhrinta sheekada (muusigaas wuxuu ku jiraa cajaladda "CD" ee Minnesota Humanities Commission). Ardayda waydii inay ka fahmi karaan meesha sheekadu ka dhacday muusigga ay dhageysteen.
- Khariidada tus carruurta si'ay u tilmaamaan meesha ay Soomaaliya ku taal.

**Su'aalaha inta aadan
akhrin:**

- Sidee kula tahay in nolosha Soomaaliya ahaan jirtay waagii hore? Guryo caynkee ah bay dadku degenaayeen? Dhar caynkee ah bay dadku xidhan jireen? Cunto caynkee ah bay dadku cuni jireen? Wali noloshaas Soomaaliya ma ka jirtaa hadda?
- Sheekadaan waxaa ku jira halxidhaale. Ma jiraa halxidhaaleyaal aad gerenaysid?
- Waa maxay jawaabta halxidhaaluhu: Waa kee cadka hilib ariga ah ee dadka walaaleeya ama isku dira?

**Waxaad sheekada ku
bilowdaa:**

Sheekadaan waxay ku saabsan tahay suldaan Soomaaliyeed oo raadinaya qof caqli badan. Wuxuu waydiiyey raggii beeshiisa inay ka jawaabaan hal xidhaalihii aan kor uga hadalnay. Ninkii ka jawaaba waxaa loo arkayaa inuu yahay qof caqli badan. Aan dhegaysano sida halxidhaalahaas loo furi doono...



**Su'aalaha inta aadan
akhrin:**

- Maxay sheekadu ku dhamaatay – waxay ku qoran tahay bogga ugu dambeeya?
- Waa maxay sababta ay gabadhu u dooratay in hungurigu yahay cadka walaaleeya ama isku dira dadka?
- Waa maxay waxa sheekadan laga baran karo?

WAXYAABO KALE OO SHEEKADA LA XIRIIRA

Farshaxanka:

- Halxidhaalayaal ku qor kaarar. Ku sawir jawaabta halxidhaalaha kaarka dhinaciisa kale. Ardayda kooxo u kala qaybi, si uu midba mar uga jawaabo inuu sheego jawaabta.
- Sawirro ku saabsan damaca ama hunguri waynaanta ka soo goo joornaal oo warqad ku dheji “collage.” Samee kuwo kale oo ku saabsan deeqsinamada. Ka hadal farqiga u dhexeeya labadooda.

Dhaqanka:

- Si aad u heshid waxyaabo kale oo aad sameyn kartid, fiiri websaydka: www.minnesotahumanities.org
- Wax ka baro dhaqanka Soomaaliya adoo galaya websaydka: <http://www.cal.org/co/somali/index.html>
- Ardaydu dib ha u fiiriyeen sawirada buugga iyo qoraalkaba si ay uga hadlaan waxay ka barten dhaqanka Soomaalida.

Jilidda:

- Kooxo ardayda u kala qeybi si ay u falanqeeyaan, fasalka ula qeybsadaan ujeedooyinka iyo dulucda sheekada, dabadeedna ha ku soo celiyeen sheekadii (iyagoo aan buugga haysan). Falanqee sida qofkasta sida uu u sheegayo ay uga duwantahay tan qoraalka ah.

Luqadda:

- Sheeg ereyada sheekada ku jira ee ku tusinaya in sheekadani dhacday waqti aad u fog.

Qoraalka:

- Raadi qeexidda naynaasta Wiil Waal ee ku jirta “erayga qoraaga.” Ardaydu sabuurrada ha ku qoreen naynaasahooda oo dhan. Arday walba wuu ka hadli karaa sida iyo sababta naynaastaas loogu bixiyey, yaa u bixiyey, iyo sida ay u arkaan naynaastooda.

Waxyaabo kale:

- Si aad u heshid akhbaar dheeraad ah oo ku saabsan sida loo isticmaalo sheeko xariirooyinka, booqo websaydka: http://edsitement.neh.gov/view_lesson_plan.asp?id=240

**Talooyin la siinayo
kuwa barta af-
Ingiriiska:**

- Sheekada siday u dhacayso oo sawir ah “story map” u isticmaal si aad ardayda ugu caawisid inay sheegaan meesha sheekadu ka dhacday, dadka ku jira sheekada, is-af garanwaaga, dulucda, iyo hal kudhegga sheekada. Booqo websaydkaan si aad u heshid tusaale: www.minnesotahumanities.org
- Ardayda Soomaalida ee af-ingiriisku yahay luqadooda labaad, u daar qeybta sheekada ee af-Soomaaliga lagu akhriinayo eek u jirta cajaladda “CD.”

**Buugaag la xiriirta
sheekada:**

- ***Mama Panya's Pancakes: A Village Tale from Kenya*** waxaa qoray Mary iyo Rich Chamberlin, waxaa sawirada u sameeyey by Julia Cairns (Barefoot Books, 2005)
- ***The Serpent Slayer And Other Stories of Strong Women*** waxaa qoray Katrina Tchana, waxaa sawirada u sameeyey Trina Schart Hyman (Little, Brown Young Readers, 2000)
- ***The Lion's Share/Qayb Libaax*** waxaa qoray Said Salah Ahmed, waxaa sawirada u sameeyey Kelly Dupre (Minnesota Humanities Center, 2007)
- ***Dhegdheer, A Scary Somali Folktale*** waxaa qoray Marian A. Hassan, waxaa sawirada u sameeyey Betsy Bowen (Minnesota Humanities Center, 2007)

